



Department of Employment, Small Business and Training

Dawlada Queensland (Queensland Government) waxay taageertaa dadka reer Queensland iyo ganacsiyada yaryar ee ka jira Queensland si ay u gaaraan awoodooda buuxda. Haddii aad bilaabayso, u baahan tahay taageero ama aad rabto in aad ganacsigaaga u jiheeyso heerka xiga waan ku caawin karnaa.

Ma bilaabaysaa ama ma leedahay ganacsi

Ganacsiga Queensland (Business Queensland)

Macluumaadka, dhacdooyinka, iyo taageerada milkiilayaasha ganacsiga Queensland iyo warshadaha ayaa laga heli karaa onlayn. Haddii aad bilaabayso, ama meherad aad leedahay, ama aad diyaar u tahay inaad heer kale gaadho, dhammaan noocyada taageerada waxa laga heli karaa Ganacsiga Queensland (Business Queensland). business.qld.gov.au

Deeqaha ganacsiga yaryar*

Dawlada dhexe, tan gobolka iyo dawladaha hoose waxay bixiyaan deeqo si ay uga caawiyaan ganacsiyada yaryar ee Queensland inay kordhiyaan awoodaha muhiimka ah oo ayna qaataan hal-abuurka, iyo si ay u caawiyaan ganacsiyada kobaca sare leh inay uga faa'iidaystaan fursadaha. *Shuruudaha u-qalmitaanka ayaa meesha kujira.

business.qld.gov.au/grants

Daahfurka Ganacsiga (Business Launchpad)

Badbaadso wakhti iyo dadaal markaad bilaabayso oo aad socodsiinayso ganacsigaaga adoo isticmaalaya Daahfurka Ganacsiga (Business Launchpad), qalab dhijitaal ah oo sahlaya in la ogaado shatiyada, ogolaanshaha iyo macluumaadka sharciga ee heerarka dawlada oo dhan, oo ku haboon baahidaada ganacsi.

business.qld.gov.au/launchpad

Ka iibi (supply) Dawlada Queensland (Queensland Government)

Soo hel sida ganacsigaagu u siin karo alaabta iyo adeegyada Queensland Government kuwooda wax iibsada. Iska diiwaangeli libso Queensland (Buy Queensland) warsidaha alaab-qeybiyaha si aad u hesho warar cusub oo ku saabsan sida ganacsigaagu uga qayb qaadan karo 2032 Brisbane Olympic and Paralympic Games.

business.qld.gov.au/supplytogov

Ku ganacsiga bannaanka

Haddii aad doonayso inaad balaadhiso ganacsigaaga adigoo ku ganacsanaya meel banaanka ah Qorshe Hawleedka Dhaqdhaqaaqa Dibadda ee Queensland (Queensland Outdoor Activation Action Plan) waxay kaa caawin kartaa inaad si fiican u fahamto shuruudaha u hoggaansanaanta iyo macluumaadka kale ee sharci ee ganacsigaagu u baahan doono inuu buuxiyo.

business.qld.gov.au/trading-outdoors

Taageerada ganacsiga yaryar

Hubinta caafimaadka ganacsiga (Business health check)

Isticmaal jeegareynta caafimaadka ganacsiga si aad u ogaato isbeddelada aad samayn karto ee ka caawin kara ganacsigaaga inuu badbaado oo uu horumarro. Ka jawaab su'aalaha si aad u qiimeeyso meelaha ganacsigaaga ku fiican yahay iyo meelaha horumarka u baahan oo hel warbixin shakhsiyeed oo leh tillaabooyinka xiga iyo talooyin, iyo isku xidhka ilaha iyo taageerada.

business.qld.gov.au/health-check

Hel latalin lacag la'aan ah iyo taageero ganacsi

Barnaamijkeena Kormeeritaanka kobaca (Mentoring for Growth) wuxuu siin karaa ganacsigaaga marin-u-helka khubarada warshadaha ee lacag la'aanta ah ee Queensland oo dhan kuwaas oo ku siin kara fikrado, xulashooyin iyo talooyin si ay u caawiyaan ganacsigaaga.

business.qld.gov.au/mentoring

ecoBiz

ecoBiz waa barnaamij lacag la'aan ah oo loogu talagalay ganacsiyada yaryar iyo kuwa dhexdhexaadka ah, oo ay maalgeliyaan Dowladda Queensland (Queensland Government). Iyadoo la kaashanayo a ecoBiz Khabiir, waxaad awoodi doontaa inaad horumariso qorshe hawleed si aad uga caawiso ganacsigaaga inay lacag u baaqato oo aad kordhiso waxtarka korantadaada, biyaha iyo biilasha qashinka.

ecobiz.businesschamberqld.com.au

Tababarayaasha ladnaanta ganacsiga yaryar iyo la-taliyayaasha maaliyadeed

Barnaamijyo kala duwan, agab iyo adeegyo ayaa la heli karaa si ay u taageeraan adiga iyo ganacsigaaga yar wakhtiyada adag. Tan waxaa ku jira tababarayaal faydaqab oo lacag la'aan ah kuwaas oo kaa caawin kara caqabadaha ganacsiga aan ganacsiyada kale la midka ahayn iyo kuwa gaarka ah, baahiyaha iyo fursadaha qaab hal qof uu si gooni ah kuula kulmayo, jawi taageero; iyo la-taliyayaasha maaliyadeed ee ganacsiga yaryar kuwaas oo ku siin kara taageero maaliyadeed oo bilaash ah, oo ay ku jiraan qorsheynta socodka lacagta kaashka ah (cash flow planning), miisaaniyad-dejinta, talo-bixinta khasaare-la'aanta iyo kaalmada xallinta khilaafaadka.

business.qld.gov.au/wellness

Golaha La-talinta Ganacsiga Yaryar ee Queensland (Queensland Small Business Advisory Council)

QSBAC wuxuu siiyaa talooyin ku saabsan arrimaha iyo fursadaha saameeya ganacsiga yaryar ee ganacsiga Wasiirka shaqada (Minister for Employment) iyo Ganacsiga Yaryar (Small Business) iyo Wasiirka Tababarada iyo Horumarinta Xirfadaha (Minister for Training and Skills Development) iyo Wasiirka Cadaalada Dhalinyarada (Minister for Youth Justice), iyo sidoo kale Dowladda Queensland (Queensland Government). Soo hel degaankaaga QSBAC xubinta laga helo si aad ugala hadasho wixii welwel ama fikrado ah oo aad qabtid.

desbt.qld.gov.au/small-business/council

Guddoomiyaha Ganacsiga Yaryar ee Queensland (Queensland Small Business Commissioner)

Guddoomiyaha Ganacsiga Yaryar ee Queensland (Queensland Small Business Commissioner) wuxuu ka shaqeeyaa sidii kor loogu qaadi lahaa jawiga shaqada ee ganacsiyada yaryar ee Queensland iyada oo loo marayo u doodista, iskaashiga, gaarsiinta mashaariicda iyo barnaamijyada, iyo bixinta macluumaadka iyo adeegyada la-talinta.

business.qld.gov.au/qsbc

Taageerada shaqaaleysiinta shaqaalaha

Barnaamijka shaqo ku laabashada (Back to Work program)*

Shaqo Kulaabashada (Back to Work) waxay leedahay taageerooyin maaliyadeed iyo kuwo aan maaliyad ahayn oo kala duwan oo loo heli karo ganacsiyada go'aansada inay shaqaaleeyaan oo sii haystaan shaqo-doone xaq u leh ayadoo loo marayo Back to Work. Tan waxaa ku jira lacag-bixinno dhiirigelin ah, maalgelinta tababarka, iyo koorsooyin gaagaaban. Waxa kale oo aad ku heli kartaa taageerada deegaanka Shaqo Kunoqoshada (Back to Work) kooxahooda ku sugan Queensland oo dhan. *Shuruudaha u-qalmitaanka ayaa meesha kujira.

qld.gov.au/backtowork

Xirfado in loo siiyo dadka reer Queensland Shaqooyinka (Skilling Queenslanders for Work)

Meheradaha yaryar ee Queensland waxay shaqaaleysiin karaan shaqaale diyaarsan iyada oo loo marayo hindise-sharciyeedka bixiya horumarinta xirfadaha, tababarka iyo fursadaha shaqo si loo caawiyo dadka shaqo la'aanta ah, kuwa shaqooyinka ka quustay ama kuwa danyarta ah ee Queenslanders.

qld.gov.au/skillingqueenslanders

Isku xidhka Qorshaynta Shaqaalaha (Workforce Planning Connect)

Shaqooyinka Queensland (Jobs Queensland) iyo Rugta Ganacsiga ee Queensland Isku xidhkeeda Qorshaynta Shaqaalaha (Business Chamber Queensland's Workforce Planning Connect) waxay kuu qalabaynaysaa qalabka lagu dhisayo awoodaha qorshaynta shaqaalaha ganacsiga. Ilaha wax ku oolka ah ayaa kaa caawin doona inaad sameysato qorshe shaqaale oo ganacsigaaga ah, wax kasta oo aad samayso iyo meel kasta oo aad Queensland ka joogto.

jobsqueensland.qld.gov.au/workforce-planning-connect

Istaraatiijiyada Shaqaalaha Queensland 2022-32 (Queensland Workforce Strategy 2022-32)

The Good people. Good Jobs: Istaraatiijiyada Shaqaalaha Queensland (Queensland Workforce Strategy) waa qorshe toban sano ah oo isku xidha dadka reer Queensland shaqooyinka, taageerda la siinayo milkiilayaasha loo shaqeeyo si ay u sameystaan dhaqamo shaqo oo loo dhan yahay, iyo kobcinta shaqaale kala duwan.


business.qld.gov.au/trading-outdoors

Nala soo xiriir

1300 654 687

info@desbt.qld.gov.au

 business.qld.gov

 business.qld.gov.au



Queensland
Government